# Kaalin Nabadeedda Maansada Soomaalida

Maxamed Cabdiqaadir Daa'uud (Stanza)
Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed
stanzasom@gmail.com

DOI: https://doi.org/10.70806/85fyfg47

## Guudmar

Daraasadan oo ah warqad cilmiyeed, waxay ku saabsan tahay: fiirinta, faalleynta, faaqidaadda, falkinta iyo falanqeynta guud ee kaalinta ay maansada Soomaaliyeed ku leedahay abuuridda, ahmiyadsiinta iyo adkeynta nabadda, iyo sidoo kale baajinta belaayada, baaska, buyuqbaayuqa, burburka, barakaca iyo basanbaaska ka beerma colaadda iyo dagaallada sokeeye ee ay muddada dheer la baaxaadegeysay bulshada Soomaaliyeed ee xididka iyo xigaalada isku wada ah.

Daraasadan oo ah mid kooban, waxay u kuurgaleysaa kaalinta ay maansada Soomaaliyeed ka qaadato nabadeynta iyo walaaleynta bulshada Soomaaliyeed oo ah bulsho leh xeerar iyo dhaqan wanaagsan oo ku dhisan walaalnimo iyo wadajir.

Waa cilmibaaris loogu talagalay helidda iyo haabashada kaalinta miiggan, muuqata ee weliba aadka u mudan ee uu maansayahanka Soomaaliyeed ku leeyahay kahortagga colaadaha sokeeye iyo kaladiridda dagaalyahannada Soomaaliyeed.

Wuxuu cilmibaaruhu cilmibaaristan ugu talagalay in ay ibafur iyo indhadillaacsi u noqoto cilmibaarayaasha Soomaaliyeed ee dhallinyarada ah ee doonayo in ay dersaan guud ahaan cilmiga nabadda, gaar ahaanna kaalinta maansayahanka Soomaaliyeed uu ku leeyahay nabadeynta iyo xasilloonida bulshada Soomaaliyeed.

**Erey Saleedyo:** Kaalin, maanso, Soomaali iyo nabad.

## Hordhac

### Qeexitaanka Maansada

Maanso waa tix leh: macne iyo miisaan, murti iyo mashiiqsi, xallad iyo xarafraac, qaafiyad iyo qummanaan, jiib iyo jabaq. Waa hawraar ku habboon dhihidda iyo dheegashada, dhegtuna way jamataa, una jeeshaa maqalkeeda, mar iyo meel kasta.

### Qeexitaanka Nabadda

Sidaan hore u soo qeexnay, nabad waa colaad la'aan, cabsi la'aan, carqalad la'aan, iyo ciil la'aan. "Rag gogoshii waa nabad," ayaa gabadh Soomaaliyeed laga guntay. Nabadda waa nolol, noloshuna waa nabad. Sidaas awgeed, nabadda waa buuq la'aan, bushi la'aan, barakac la'aan, baraaro wadajirka bulshada saldhig adag u ah.

Qoraa Deeqa Jaamac Colujoog waxay nabadda ku qeexday oo ay buuggeeda Diiwaanka Nabadda (Hore, Hadda iyo Hadhow) ku qortay, "Nabaddu waa xaalad isku kalsooni wadareed, naf isku

aamminid, is dhexmar, isu hilow, isu hoyasho, iskaashi yeelasho iyo wada noolaansho guud oo asaas saldhigeed u ah koboca iyo taranka bulsho…" (14). Waa qeexitaan qurxoon, kuna qotomo macnaha nabadda.

**Mashaqada Cilmibaarista**

Dhibaatada ay cilmibaaristan isku dayeysa in ay xalliso waa ahmiyad la'aanta doorka ay maansada Soomaaliyeed ku leedahay beeridda iyo bullaalinta nabadda bulshada Soomaaliyeed oo aan ilaa iyo hadda laga sameynin cilmibaarisyo aqooneed, in kasta oo ay jiraan buugaag laga qoray oo ay ka mid yihiin buugaag kooban oo ay qoreen qoraayo Soomaaliyeed oo aan ku arki doonno daraasadan. Mashaqo wuxuu cilmibaaruhu ula jeedaa qaddiyadda taagan ee xalka loo doonayo. Sidaas darteed, cilmibaaris kasta oo la sameeyo waxay xal u raadisaa dhibaato jirta. Ugu dambeyn, waxay daraasadan baadigoob ugu jartaa xallinta mashaqada sare.

**Ujeeddada Cilmibaarista**

Ujeeddada guud ee cilmibaaruhu u sameeyey daraasadan waa in wax laga ogaadaa kaalinta mudan ee ay maansada Soomaaliyeed ku leedahay daminta colaadaha sokeeye ee ka dhex dhaca beelaha bulshada Soomaaliyeed - ma-kacda iyo kacdaba. Midkan waa yool gudban oo gude ballaaran, una baahan baraarug aad u dhidban.

**Sababeynta Cilmibaarista**

Sababta koowaad ee uu cilmibaaruhu daraasadan u diyaariyey, cilmibaaristanna u sameeyey, waa in uu isaga laftirkiisa ka mid yahay hal-abuurrada Soomaaliyeed ee nabadda ka maansooday. Wuxuu leeyahay maansooyin nabadda uu ka tiriyey iyo diiwaanno kala duwan oo maansooyinkiisa uu ku qoray kuwaas oo ku kala qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska. Waa diiwaanno la daabacay oo la faafiyey. Haddaba, cilmibaaruhu wuxuu aqoon fiican u leeyahay doorka maansada nabadda.

Sababta labaad ee maangalka ah ee ka dambeysay xiiseynta maansada nabadda ee cilmibaaraha ku dirqisay in uu sidan u daneeyaa maansada nabadda, waa in uu bartay Cilmiga Nabadda. Wuxuu shahaadada labaad ee jaamacadda ka qaatay Xarunta Daraasaadka Sare ee Diblamaasiyadda Nabadda ee Jaamacadda Baxri ee ku taalla caasimadda Dalka Suudaan – Khartuum. Wuxuu ku takhasusay Daraasaadka Nabadda iyo Horumarka. Sidaas awgeed, wuxuu aqoon durugsan u wada leeyahay maansada oo uu hibo Rabbi ku helay iyo nabadda oo uu jaamacaddiisii ku bartay.

Dhugtanka saddaxaad waa in uu cilmibaaruhu maaddada Nabadda iyo Xallinta Khilaafaadka ka dhigayey Jaamacadaha dalka 2016 – 2026. Muddadaas wuxuu baaris xeel dheer ku sameeyey doorka maansada Soomaaliyeed ay ku leedahay nabadeynta beelaha Soomaaliyeed ee mararka qaar ku dagaallama darka iyo daaqa.

Arrinka afraad waa in uu cilmibaaruhu yahay tababare nabadeed oo muddo 10 sano ah bixinayey tababarro cilmiyeed ku saabsan kahortagga colaadaha, wadaxaajoodka, dhaxdhaxaadinta, maareynta musiibooyinka colaadaha ka dhasha iyo xallinta colaadaha

beelaha/qabiillada Soomaaliyeed oo uu aqoon ilaa xad ah u leeyahay.

Sababta shanaad waa in uu cilmibaaruhu tababarro heer caalami ah ku soo qaatay cilmiga nabadda iyo xasiloonida. Waxaa tababarradan siiyey: Kursiga Nabadda ee Haayadda UNESCO iyo Machadka Clingendael ee laga leeyahay Dalka Holan. Tababarradaas ayaa lagu siiyey shahaadada Tababarka Tababarayaasha ee (TOT).

Marka la isku geeyo dhammaan sababahan sare ku taxan, waxay daraasadan ka dhigayaan mid salka ku haysa hibo maanseed iyo hanasho aqooneed sal iyo saabba u ah sugnaanta cilmibaaristan iyo saxnaanta kalsoonideeda cilmiyeed ee dhabta ah. Waa cilmibaaris ka shidaalqaadatay qodobada sare iyo kuwa kale ee aan la sheegin.

**Muhiimadda Cilmibaarista**

Cilmibaaristan waa mid muhiim u ah kobaca iyo koritaanka aqliyadda nabadda ee bulshada Soomaaliyeed ee ay daashadeen colaadaha rakaadda ah ee ku raagay. Waxay aragti ku biirineysaa in maansada Soomaalida looga faa'iideysan kara daminta colaadaha bulshada riiqay, ragaadiyey, rafaadiyey ee weliba raafqarariyey.

Cilmibaaristan waxay waxtar u leedahay cilmibaarayaasha Soomaaliyeed ee inta badan aaminsan in aanan afka Soomaaliga lagu sameyn karin cilmibaaris shindhalad ah, sababo ku aaddan af Soomaaliga oo ay ku yar yihiin erey cilmiyeedka saxan ee loo adeegsada ereybixinta cilmiga ku dhisan ee daraasaadka aqoonta heerka sare. Mala-awaalkan waa mid uu malaggii galay oo been-abuur iyo huuhaa iska wada ah. Maxaa yeelay, waxaa soo afjartay oo albaabada u laabtay cilmibaaristan kooban.

**Musdambeedka Cilmibaarista**

Musdambeedka cilmibaaristan waa doorka ay maansada Soomaaliyeed ku leedahay nabadda. Sida ay na barayaan meerisyada kookooban ee ay mariyeen dhawrka abwaan ee Soomaaliyeed ee hoos ku xusan, maansada Soomaaliyeed waxay kaalin aan la dhayalsan karin ka ciyaartaa nabadda. Saas ahaan, gabyaaga Soomaaliyeed waa ergey nabadeed oo kaalin qori horaad ah kaga jira dhalinta iyo dhawridda nabadda. Waxaan arrintan ku xoojin doonnaa maansooyinka daraasadan ku jira.

**Xayndaab Juquraafiyeedka Cilmibaarista**

Daraasadan waxay ku saabsan tahay dhammaan maansooyinka nabadda ee ay curiyeen abwaannada Soomaaliyeed ee ku nool dhulka Soomaalida sida, kuwa ku nool gudaha Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS), dalka Jabbuuti (DJ), Dawlad Deegaanka Soomaalida (DDS), Ismaamullada Gobolka Waqooybari - (IGW) – Ismaamulka Gaaris, Ismaamulka Wajeer iyo Ismaamulka Madheeraa – iyo Bulshada Dibadjoogga ah ee Soomaaliyeed (BDS) ee dunida oo dhan ku filiqsan. Sidan oo ay tahay, maansooyinka la helay ee mawduucan ku saabsan, ayay soo bandhigeysaa ee hannaan saamiqeybsi iyo hayb reereed looma cuskan baaristan.

## Kaalin Nabadeedda Maansada Soomaaliyeed

Sida ay caddeynayaan maansooyinka hoos ku taxan ee ay curiyeen abwaannada Soomaaliyeed ee kala duwan, door wax-ku-ool ah ayay maansada ku leedahay, abuuridda, ilaalinta iyo intifaacsiga nabadda, xasilloonida iyo wadajirka bulshada.

Abwaankii asaasaha, afmaalka iyo hoggaamiyaha u ahaa ururkii gobannimadoonka Soomaaliyeed ee Daraawiish, Sayid Maxamed Cabdille Xasan Nuur, waxay dadka Soomaaliyeed ku yaqaannaan in uu ahaa gabayaa, hoggaamiye, dagaalyahan iyo colwadeen u taagnaa weerar iyo weerarcelis. Maansooyinkiisa waxaa ku badan guubaaba dagaal, guluf la dumay, garnaqsi gumeysidiid iyo Soomalikicin. Sidan oo ay tahay, wuxuu curiyey maansooyin mug iyo miisaanba leh oo nabadda ku saabsan.

### Hurud

Meeris gabayga ah ee hoose, wuxuu Sayid Maxamed Cabdille Xasan si xeeldheeri suugaaneed iyo xirribdheeri falsafadeed leh ugu soo bandhigayaa muhiimadda nabadda. Wuxuu Sayidku caddeeyey in hurdada iyo nabadda ay isku xiran yihiin oo marka nabad la haysta un hurdada si raaxo leh looga bogon kara. Waa meeris aad iyo aad inoogu dhiirrigelinaya in aynu nabadda mudnaan iyo maamuus sare siinnaa. Waxaa ku cad in nabad la'aan ay nasiino la'aan iyo nolol la'aanba tahay. Sidaas darteed, Sayid Maxamed wuxuu meeriskan ku bilay aqoonfahanka nabadda waarta.

*Hawo iyo hilow gacalo iyo, hurud nabdoon baa leh… (Ciise 165).*

### Raaxo

Mar kale ayuu Sayid Maxamed meeriskan hoos ku xusan ku soo bandhigay raaxada iyo raynraynta nabadda, kuma uusan bandhigin oo keliya ee wuuba ku sii boqray.

*Rabbaa deeq leh roob baa qabow, raaxo nabad baa leh… (Colujoog 20).*

### Gogol Nasteexaad

Abwaan Maxamed Fiin, Allaha u raxmadee, oo ka mid ahaa gabyaagii Reer Burco ee ka qeybgalay Silsiladda Guba oo ay ku hardameen abwaanno kale oo ay ka mid ahaayeen: Cali-dhuux Aadan-goroyo, Qammaan Bulxan Yuusuf, Salaan-carrabey iyo hal-abuurro kalaba, wuxuu caqliyadda nabadda ku soo gudbiyey meeriskan:

*Gaal iyo Islaam nabaddu waw, gogol nasteexaade… (Colujoog 14).*

Waxaa xaqiiq ah in meeriskan halmuceedka ah ee ka soo maaxday maskaxdii Abwaan Maxamed Fiin uu yahay mid xambaarsan aragti yaab leh iyo ilaaq dheer. Waa meeris ka qaalisan dahabka, dirhamka iyo doollarka. Waa beyd falsafada ku jirta dhumucdeeda lala dhaygagayo oo macna kasta oo ay nabad leedahay koobay.

Fiin wuxuu caddeeyaa in ay nabaddu tahay ama ka dhigan tahay gogol ay isku si ugu gam'aan Gaalada iyo Muslimiinta. Wuxuu waafaqaa xigmadda

gabadhii Soomaaliyeed ee aan sare ku soo xusnay oo uu weliba isagu baro sii dheereeyaa.

**Naruuro**

Meerisyada hoos ku taxan (qoran) waxaa nabadda ka tiriyey Abwaan Cali Xasan Cawil (Cali-Food) oo ka mid ah abwaannada Soomaaliyeed ee Reer Buuhoodle. Wuxuu nabadda ku sheegaa in ay tahay "naallo iyo guul" colaaddana "naf go'da iyo naafo aan kicin." Wuxuu kaloo caddeeyaa in uu abwaanka Soomaaliyeed yahay dige oo wuxuu soo qaatay magaca Nadiir oo la macna ah Dige. Waa magac Quraanka aan ku aragnay oo ambiyada loo isticmaalay in ay yihiin digayaal ummadda uga digay naarta, uguna baaqay tubta jannada loo maro. Nuxurka gabaygan dheer ee aan dhawrkan meeris ka soo qaadannay, waa in uu abwaanka Soomaaliyeed door muhiim ah ka qaato nabadda iyo danta guud oo uu yahay Dige maansadiisa ku nabadeeyo oo xumaanta colaadda iyo wanaagga nabadda ugu kala caddeeya.

*Nabaddu waa naruurada Ilaah, nagu nimceeyaaye*
*Waa nolosha lagu dhaato iyo, naallo iyo guule*
*Ummaddii nasiibka u heshaa, waa najaxaysaaye.*

*Nabarrada colaadahana waa, lagu nuglaadaaye*
*Naf go'diyo waxaa laga dhaxlaa, naafo aan kicine*
*Aniguna nadiir digaya iyo, naadi baan ahaye*
*Ummad yahay nasteexada gartoo, nabadda xoogeeya (Daljir). Seb 30, 2020.*

**Nabad baa Naas la Nuugo Leh**

Maahmaahdan hoose, waxay gudbineysaa farriin nabadeed ay ka muuqdaan fariidnimo suugaaneed, farshaxan maahmaameed iyo faafin xasillooni oo ay dulucdooda fog tahay. Waxaa hees ku dhax adeegsaday Abwaan Sahal Macallin Ciise oo nabadda muhiimaddeeda noogu sheegay in ay tahay naas la nuugo. Waxaan og nahay waxtarka uu naaska hooyada u leeyahay ilmaha. Si uu noo fahansiiyo waxtarka nabadda, ayuu naaska hooyada ku tilmaamay, isagoo maahmaahmaanseeyey. Waxay hadda isu beddeshay halhays uu dadku adeegsado.

*Nabad baa naas la nuugo leh… (Colujoog 14).*

Halhayskan xigmadda badan, wuxuu aad u soo caanbaxay sanadkii 2000 oo uu Allaha u naxariistee, Abwaan Sahal Macallin Ciise curiyey. Waxaa aad warbaahinta looga bartay markii uu socday Shirkii Dibuheshiisiinta Soomaalida ee Carta oo uu martigaliyey Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle – Madaxweynaha Jabbuuti.

Mahmaahdan la maahmaahmaanseeyey waxay noqotay halhays nabadeed iyo halkudheg walaalnimo, sababtoo ah, wuxuu Abwaan Sahal Macallin Ciise ku walaaleeyaa bulshada Soomaaliyeed oo uu kaga dhigaa walaalo naas hooyo wada nuugay oo si walba danwadaag u ah. Sidaas darteed, tuducdan waxay ka mid tahay dhaxalka uu Soomaalida uga tagay Abwaan Sahal Macallin Ciise (1948 – 2013), waana xusuus aan guuri doonin oo ay in badan sii xusuusan doonaan, xiganna doonaan dadka Soomaaliyeed ee dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba wada deggan. "Sahal Macallin Ciise oo London ku Geeriyooday." VOA, 10 Neefeembar. 2013.

Allaha u naxariista Abwaan Sahal Macallin Ciise oo ka soo jeeday Gobolka Baay, wuxuu ka mid ahaa abwaannada curinta maansada lahjadda Maayga ugu caansanaa.

Waxaa xusid mudan in uu cilmibaaruhu maqlay in maahmaahdan uu maahmaahmaanseeyey abwaan kale oo Reer Baydhabo ah. Waa belaf aan aad loo hubin sugnaanteeda, taas oo aan u suurtagalin cilmibaaruhu in uu runteeda soo xaqiijiyo. Sidaas oo ay tahay, helidda iyo hubinta arrintan waa lagu raadjoogaa.

**Sahay**

Abwaan Ducaale Aadan Qoolaab oo ka mid ahaa hal-abuurrada Gobolka Togdheer, wuxuu muhiimadda nabadda ku soo gudbiyaa labadan meeris ee hoose oo ah laba meeris oo aad u qurux badan, qaayo ahaan, qawl ahaan iyo qodob ahaan, intuba:

*Sow nabadi sahaydaada, ood sidato uun ma aha?*

*Sow godobi surunkaad martaba, sabab qarsoon ma aha? (Xalane 2021).*

Abwaan Qoolaab wuxuu meerisyadan ku caddeeyaa in ay nabaddu tahay sahay; halka godobta uu ku sheegay sabab (hed) surun walba kuu taagan oo ku salfanaysa. Sahayda waa tiir dhexaadka nolosha aadanaha. Qof aan sahay sidan way ku adag tahay in uu noolaadaa oo uu safar iyo socdaal galaa. Sidoo kale, waxaa adag in uu qof godob qabaa dariiquu doono daanshadaanshood ku maraa. Godobtu waxay ka dhalataa colaadda; sahayda waxaa saldhig u ah nabadda iyo xasilloonida. Sidaas darteed, meerisyadan waxay caddeyn u yihiin doorka maansada iyo maansayahanka ama abwaanka Soomaaliyeed ee nabadda, xasilloonida, wadajirka iyo derisnimada.

**Caafimaad iyo Cudur**

Labadan meeris ee hoos ku taxan (xardhan) waxaa curiyey Abwaan Cismaan Kaarshe (Gabaynabsiile). Wuxuu nabadda ku sheegaa “Caafimaad,” colaaddana wuxuu ku tilmaamaa “Cudur.” Waa laba meeris oo buuraha ka baaxad weyn, ka qaalisan kun halaad oo haleela ah, kana sii aqoon badan dhakhtarka haysta PhD-da.

Haddii aan si sax ah & saani ugu fiirsannaa dulucda falsafada nabadeed ee ku duugan labadan meeris, waxaan garan karnaa qiimaha caafimaadka iyo qarowga cudurka. Haddaba, meerisyadan waxay tusaale cad u yihiin in maansayahanka Soomaaliyeed uu kaalin dhidban oo dhararan ku leeyahay nabadeynta bulshada Soomaaliyeed.

*Cabdillaahiyow nabadi waa, caano kuu rarane*

*Cudur lama yaboohsado adoo, caafimaad qabo’e. (Golaha 242).*

**Gacalo**

Gabaygan hoos ku qoran oo uu tiriyey Abwaan Cambaashe Cali Caarre, waa gabayga cilmibaaraha ugula cajiibsan ee nabadda laga tiriyey. Waxaa lagu tilmaami karaa in uu yahay hormuudka maansada nabadda Soomaaliyeed. Wuxuu gabyaagu gabaygiisan xulka, xaruurida iyo xariirta ah noogu tixeeyaa xeeldheerida iyo xirribdurugsanaanta Abwaan Cambaashe Cali Caarre iyo masuuliyaddiisa qof ahaaneed ee uu

iska saaray boorrinta iyo bulaalinta nabadda waarta wanaaggeeda.

Waa gabay ta'wiil toosan, tilmaan qurxoon iyo tayo sare kulansaday oo dulucda iyo dabuubta ku jira ay diirka ka qaadayaan in maansada Soomaaliyeed ay kaalin hanaqaad ah ku leedahay nabadda bulshada Soomaaliyeed iyo walaaleynta dadka.

Sida uu dhaqanka Soomaalida yahay, qofka gooman (gaajeysan) caano ayaa loo lisaa ama cad baa lagu sooraa. Haddaba, loog iyo lis waa ficil gobeed. Si uu gobannimada nabadda noogu muujiyo ayuu noo sheegaa in uu nabadda labadaasba ula diyaar yahay. Ninka guursanaya waxaa lala garab istaaga kaalo; midka la dulmay ee la xaqduudsiyeyna waa loo gurmadaa. Labadan ficil ee bilista (goobta) lagu yaqaan, ayuu Abwaan Cambaashe nabadda ula diyaar yahay. Ugu dambeyn, soo dhab ma aha in ay maansada door doorroon nabadda ku leedahay? Haa, waa dhab sii sugan.

*Haddii nabaddu ruux gaara tahay, oo la garanaayo,*

*Gurigaan ku sooryeyn lahaa, gacalo awgeede*

*Guullow ma yeeleen waqeed, in ay wax gaadhaane.*

*Hadday tahay qof goommani qabiyo, gaajo iyo baahi,*

*Intaan goolal naaxiyo u qalo, geeso wanan yeeshay,*

*Gadhka daribta waw galin lahaa, caanihii Goraye.*

*Hadday tahay nin guur doonayoo, gaari sahankeed ah,*

*Geel iyo anoo aan fardiyo, guuyo kaga qaadan*

*Gabadhayda waan siin lahaa, guudka laylidaye.*

*Hadday tahay nin gaadiyo wadaan, guluf ka taag rooni,*

*Gaashaanka waw qaban lahaa, gaanka weeraraye*

*Gembina wawgu taagnaan lahaa, geerida horteede*

*Allow waa gundhee nabadgalada, yaan waxba u geysan. (Colujoog 23).*

**Maslaxad**

Abwaan Carays Ciise Kaarshe, Allaha u naxariistee, wuxuu dheefta iyo duxda nabadda ku dhambalay oo noogu kala dhigdhigay labadan tuduc ee saarka ah:

*Maslaxaddaad suubsataa*

*Aakhiro kuu meelmartaa ... (Cali 86).*

Abwaan Carays Ciise Kaarshe oo ka soo jeeday Gobolka Jubbada Hoose, wuxuu noo sheegaa in maslaxadda (nabadda) ay aadduun ha joogee; aakhirana nagu anfaceysa. Ereyga maslaxad waa samo. Samo waa nabad. Soomaalidu waxay dhahdaa: hebel waa sama-ka-talis oo loola jeedo hebel waa nin nabadeed. Haddaba, meerisyadan aan Carays ka dhaxalnay, waxay muujiyaan doorka maansada ay ku leedahay nabadda iyo in uu abwaanku yahay nabaddoon bulsheed oo dhab ah. Marka aan maansada leennahay, ujeedku waa abwaanka.

**Soomaali Ha Laysla Doonta**

Tuducyadan hoos ku qoran waxay ka mid yihiin maanso ay alliftay Saado Cali Warsame, Allaha u naxariistee. Waxay nabad iyo wadajir ugu baaqdaa dadka Soomaaliyeed. Waa tuducyo

qofeyn ah, qarandoon ah oo weliba qiimo badan. Waa tusaale kale oo noo muujinaya kaalinta maansada ee nabadda bulshada.

*Hargeysaay Xamar u yeedh*
*Kismaayooy u hees Garoowe*
*Jabbuutaay Gaarisa la hadal*
*Jigjigaay Hiiraan u baaq*
*Hobyooy Baydhabo salaan*
*Soomaali ha laysla doonto (Ismaaciil 117).*

**Nasiino iyo Nusqaan**

Gabaygan hoose oo uu nabadda ka tiriyey Abwaan Cabdullaahi Baddal Cabdi Qammaan oo Reer Qorraxey ah, wuxuu abwaanku sawir qurux badan kaga bixiyaa waxtarka nabadda oo uu ku sheegaa nasiino, nafis, naq, nuur, naas iyo deggani, iyo colaadda oo uu hal-abuurku ku tilmaamaa nuxuus, naxli iyo nusqaan. Waxaan macnaha ereyadan ka garan karnaa dheefta nabadda ay leedahay iyo dhabta ay colaadda leedahay ee halista ah. Waa gabay caddeyn u ah doorka maansada ay ku leedahay nabadda bulshada Soomaaliyeed ee iskudhoonka iyo iskudhafkaba ah.

Gabaygan waxaan ka garan karnaa garaadka iyo garashada gabayaaga iyo sida uu had iyo goor ugu darban yahay nudidda iyo naaxinta nabadda iyo bedqabka dadka.

- Gabay nabadda guud ka hadlayoo, taaban nuxurkeeda
- Colaadduna nuxuus iyo inay, noohi tahay sheega
- Oo labada nooc kala saxaan, maanta nudayaaye
- Naqshaduhu siday kala yihiin, daya namuunkooda

- Midu waa nasiiniyo deggani, lagu nimcoobaayo
- Marna waa naq roob oo indhuhu, nuur ka helayaane
- Marna waa nabaad simay dhulkoo, caato naaxsho ehe
- Niyadsamiyo waa shay farxada, oo la naawilo'e
- Nafis weeye aad naas irmaan, nuugi waligaaye
- Gobannimada waa nooc ka mida, waana naxariise
- Ummaddii nasiib lahaa heshoo, nabadi waa guule
- Naf iyo maalba aan hurro oo, axadna yuun noogin
- Tan najixiyey tii kalana aan, nuunka ka caddeeyo

- Naahuuradeeda aan bandhigo, waa nusqaan go'ane
- Naxligeeda aan muujiyiyo, nooca ay tahaye
- Nin rageed colaadey adaw, diiday noloshiiye
- Nacasyada adaa urursadiyo, naafaclaawaha'e
- Nahyi kama xishootide wax daran, naadisaad tahaye
- Fidmo naban ninkii toosiyee, naadiyee kiciyo
- Inuu nacallaqabe kaasi yahay, waa xaddiis nabiye

- Annaguna naskaannu ayidi ee, nacamlayaashaada
- Iyo adigu naarta isla gala, naajisaad tahaye (Xalane 34).

**Colka Jooja**

Geeraarkan soo socda ee caanka ah, ee nabadda ku saabsan, ciwaankiisuna uu yahay “Colka Jooja,” waxaa curiyey Abwaankii Soomaaliyeed ee buuniga ahaa, Maxamed Maxamuud Xirsi (Salaancarrabey). Sida aan ka soo xigtay buugga “Godob La’aan” ee uu qoray Abwaan Xuseen Cabdi Xalane (73 – 75), wuxuu Abwaan Salaan, Allaha u naxariistee, geerarkan ku kala badbaadiyey jilibka Axmed Faarax iyo jilibka Daahir Faarax oo ka wada tirsan Qabiilka Habar Jeclo ee beesha Soomaaliyeed ee Isaaq oo ay colaad xun dhex martay, maalinkaasna ay colalkooda is hor fadhiyeen.

Geerarkan wuxuu daliil iyo caddeyn dhab ah u yahay doorka ama kaalinta ay maansada Soomaaliyeed ku leedahay baajinta colaadda iyo badbaadinta bulshada.

*Maalintii Cumar Daahir*
*Isku gooyey cayaartiyo*
*Nin Caloolacad joogay*
*Oo Meygaag Ciidan warqaatay*
*Waa cibaaro qabaayoo*
*Balaayuu curufkeediyo*
*Camalkeeda yaqaane*
*War tolow colka jooja!*
*Nin habeenno casheeyey*
*Cadar aan hadh lahayn iyo*
*Ceeryaamaa isugu toosta*
*Oo inuu caafiyaddiisa*
*Cabbaar meel la fadhiisto*
*Caqligaanay galeyne*
*Waar tolow, colka jooja!*

*Carrabkaan ku hadlaayana*
*Nin callenti caddaatiyo*
*Caamadaan garaneyn oo*
*Kolkay caruuri dhintaane*
*Cutub weyni idlaataa*
*Lays canaanan haddhowe*
*Waar tolow, colka jooja!*

*Labadiinnan curee*
*Isu coobbaridaayow*
*Cidna ways u xignaa*
*Ciilna ways u qabnaa*
*Canlana waa is ogeyne*
*Shantii Caadle lahayd iyo*
*Curadkii habartay iyo*
*Cali Fiin ma illaawin*
*Oo raggii ceeriga yiillay*
*Cabasaannu ahayn oo*
*Jaamacii calmanaayee*
*Codkar noogu horreeyiyo*
*Rabjaan baydin cayaayir*
*Iyo caadadhaaf ku disheen*
*Oo haddii aad is cuntaan*
*Idin caabudan maayo*
*Oo waa intaan mid la ciidmi*
*Oo ka kaleeto ku ciiriye*
*Waar tolow, colka jooja!*

*Intii baad cantarteenoo*

*Cunkadaydin marteen*

*Oo meydkiinnii cammirraaye*

*Candhadheerta dhurwaa iyo*

*Ciidda haaddu ku jiidday iyo*

*Cuqduudkii ka baxdeen*

*Oo cosobkii balanbaal iyo*
*Caleentii karamaan oo*

*Cayn baa oo gudhsateen*
*Oo cambartii geela dhaleysiyo*

*Adhaa ceegan guryaa'e*
*Waar tolow, colka jooja!*

*Nin carruur iyo maato iyo*

*Calli reero la yaal oo*

*I coofaaya golaa*
*Oo cararaaya hadhow iyo*

*Nin colaad talinaaya oo*

*Caddaystay idinka buuxa'e*

*War tolow colka jooja!*

## Halaso

Buraanburka hoose oo ay alliftay Siciido Cilmi Rooble, waxay ku soo gudbisaa xumaanta colaadda iyo xaruurinnimada nabadda. Waa tusaale kale oo aan si dhab ah ugu caddeyn karna in ay abwaannada Soomaaliyeed kaalin ka qaataan nabadda.

*Halasihii ololey iyo, hanad wixii ku tagay*

*Hanti wixii raacay iyo, hooy wixii ku dumay*

*Hawl kaloon qaban lahayn, hagar wixii ku yimi*

*Dhaqaalaha heermay, hangallaysigii ku dhacay*

*Halbowlaha go'ay, hayaankii bulshada ahayd*

*Anoon ha lagaa maqliyo, magac ku haybsanayn*

*Nabadda soo hoyatay, hambalyaan u dira hayaa (Colujoog 25).*

Haddii aan aad ugu fiirsannaa dulucda buraanburkan, waxaan garan doonnaa oo aan garwaaqsan doonnaa wax-ku-oolnimada iyo waaya-aragnimada aan ka baran karna tusaalooyinka ay naga siisay burburkii colaaddii sokeeye ka dhashay iyo turxaan la'aanta talada ay maansadeedan kooban dadka Soomaaliyeed ugu soo gudbisay.

## Shacabka

Gabaygan hoose oo ciwaankiisa uu yahay "Shacabka" wuxuu Abwaan Maxamed Cabdiqaadir Daa'uud (Stanza) ka hor jeediyey waftigi dawladdi uu hoggaaminayey Madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf Axmed, Allaha u naxariistee, iyo waftigi Ururkii Midowga Maxkamadaha Islaamiga oo uu xilligaas wadahadal nabadeed oo ay gogoshiisa u wada fidisay Dawladda Suudaan uga socday Khartuum. Wuxuu labada wafti kula taliyey in ay nabadda ka wada shaqeeyaan, kana mahadceliyaan dedaalki nabadeed ee Madaxweynihii Suudaan ee xilligaas, Maarshaal Cumar Xasan Axmed (Al-Bashiir), iyo shacabkiisa wadartood oo Soomaalida aad u soo dhaweeyey.

Abwaanka oo ay u muuqatay awooddii uu waftigi UMMI ah isbidayey iyo weliba sidii ay u quursanayeen waftigi XKMG, iyo dhagartii shisheeyaha badan ee Soomaalida, wadar ahaan, loogu maleegayey oo ay Carabtuna ka mid ahayd, Somali Crisis Group iyo dhinacyo kalana ay markaas ku loollamayeen, ayaa ku nuuxnuuxsaday shakiga uu ka qabay shacnigii

cusboonaa ee siyaasadeed ee Soomaalida la soo dersay sanadkii 2006. Saas ahaan, wuxuu muujiyey in shacabka ay shuuciyoobid iyo shareecoobid isaga u ifaysay waayoo, waa dad Muslimiin ah.

Gabaygan waa caddeyn kale oo muujineysa doorka hal-abuurka ee nabadda iyo sida uu uga maansoodo halka ay jirta danta dadka, dalka iyo diinta. Wuxuu gabyaagu ku sheegaa gabaygan marxaladihii la soo maray ee qabqablayaashii Soomaaliyeed ay ku kadeedeen shacabka Soomaaliyeed, sheekhyada cusub sha'nigooda iyo in dadka Soomaaliyeed ay u baahan yihiin nabad ay ku noolaadaan, kuna wada nastaan. Waa maanso ay ka muuqdaan, aragti saxan, oddoros fog iyo ogaal siyaasadeed dhab ah.

Haddii ay go'aamiyayaashii siyaasadda Soomaaliya ee labadii garab qaadan lahaayeen talada tixeed ee uu gabaygan xambaarsan yahay, waxaa hubaal ah in laga baaqsan lahaa dhibaatooyin waaweyn oo dhacay iyo dhiig badan oo aad u daatay.

*Shan diraac shan dayroo mar kale, labashanaadeeyey*
*Raggii shamalka loo tumi jiree, shacabka daanneeyey*
*Sharaftiyo raggii qaran dilee, shayna curin waayey*
*Ee soo shuraakoobayee, shilimo soo qaatay*
*Mar haddii Shilkihi lagala haroo, laga shuroonaaday*
*Bal aan eegna waxa soo shirtaga, waa shacni cusboone.*

*Dawladdaan shalay soo dhisniyo, sheekhyada adkaaday*
*Iyo shacabka Soomaaliyee, umalku shaandheeyey*
*Waa inay shir weyn wada galaan, oy shindhaliyaane*
*Waa inay wanaag shaaciyaan, kana shaqeeyaane*
*Waa inay shax nabadeed degaan, dhab u shabbaaxaane*
*Oy danaha guud shaakiraan, kana shuruudaane.*

*Niman yohow dagaal waa shar iyo, aragti sheydaane*
*Shaqiiq iyo walaal baan nahaye, sheen ha laga dhawro*
*Hawlaha shuboo noo shaqshaqa, waa shukri Ilaahe*
*Shareecada Islaam baan nahaye, yaan la shurabaadin*
*Shukaanteennu waa sharaca guud, shaabbagalintiiye*
*Rag yohow shisheeyiyo dillaal, shoonxul ka ogaada.*

*Niman yohow dadkaa shiilmayee, dhiiggu shagaxleeyey*
*Ee wada shiddoobee shakalan, shaagna rogi waayey*
*Shuucinnimo inay qaadan iyo, inay shareecoobi*
*Shacabkaa middaa kala caddeyn, waa shaki la'aane*
*Sharxid iyo hannaan baa habboon, sheybe iyo wiile*
*Shafadli'i haddii lagu bahdilo, sharafdhac weeyaane.*

*Mar hadduu shaqiiq gogol fidshoo, loo dhan yahay sheeko*
*Gacal lama shareystee xurmaa, lagu shareeraaye*
*Waa shuqul gob laga naawilaa, inaan shafeecnaaye*
*Shukran baan Bashiir leennihiyo, shacabka Suudaane*
*Niman yohow shalleyto ha hartee, shoobbarada daayo*
*Shaamareer ha noqatee unkoo, dan isla shaybaadha.*

*Haddii kale shar iyo ceeb alkuma, shuqulladiinniiye*
*Shaanshaan colaadeed calmada, sheex ka dhimateene*
*Anaa shamin anaa shaabugeyn, shaaric la istaaga*
*Shafad li'idi horaan loogu go'ay, shaafulqabaxleeya*
*Dabadeed dunuub wada shabbaca, kana shallaaytooda*
*(Daa'uud 180 – 181).*

**Gobonimo iyo Gunnimo**

Buraanburkan hoos ku xusan waxaa magaalada taariikhiga ah ee Taleex ka marisay Hibo Jaamac Cabdi Boos oo Reer Taleex ah, taas oo muhiimadda nabadda cabbirtay. Waxay ka tirisay madal nabadeed oo ay ku heshiinayeen laba reer oo ay colaad halkaa ku dhex martay. Waxay nabadda ku sheegtaa in ay tahay gobanimo; halka ay colaadda ku sheegtay gunnimo. Waa buraanbur daaha ka

qaadaya doorka maansada iyo maansayahan ay ku leeyihiin xoojinta nabadda guud iyo baraaraha bulshada.

*Nabaddu waa goof biyo leh, oo la wada gudhsado*
*Haddana waa geed midho leh, oo la wada gurtaa*
*Haddana waa gobanimiyo, geel la maalayaa*
*Ninkaan garaneyninoow, waad garaad yar tahay.*

*Colaad waa lagu gumoobaaye, ma leh gabbaad*
*Laguma guuleysta oo, geesiyaa ku lumo*
*Ninkaan garaneyninoow, waad garaad yar tahay. (Bile). Dis 29, 2018.*

**Dhudaha Reer Magan**

Meerisyadan hoose ee uu tiriyey Abwaan Qamaan Bulxan Yuusuf, Wuxuu ku caddeeyaa in colaaddii jifadiisa Reer Magan Warfaa ay aad u saameysay. Wuxuu meerisyadan hoose ku qeexaa in ay ragannimadiisii dhaawacday oo uusan Dheddig iyo lab midna ahayn, intii ay colaaddaas sokeeye ka taagneyd Doollo iyo Ciid, sidaas darteedna uu raayaha (Xiniinyaha) laashay oo dhabarka marsaday. Wuxuu cabbiraa in uu caadi ku soo noqday ka dib markii uu qoyskiisa nabad ka dhex abuuray.

Falsafada ku duugan meerisyadan waa in ay colaadda ragga u diidda hamadda sababtoo ah, nin dhiilleysan kansha u heli ma hayo laraaxaysiga marwadiisa oo wuxuu ka baqayaa in ay gaade iyo gaaddiile helaan oo birta ka aslaan, isagoo mashquul ah. Wuxuu Abwaan Qamaan Bulxan ku taagtaagsadaa in ay colaadda taranka cadow ku tahay; halka nabadda ay fididda firka u fiican tahay. Sidaas awgeed, meerisyadan waxay daliil cad u yihiin kaalinta maansada ee nabadda iyo guusha ay ka keenta dhaqangelinta degganaanta, xasilloonida iyo midnimada guud.

*Dhulka inaan ka jiitiyo anoy, dhimasho ii joogto*
*Oo dhabarka raayaha marsaday, sida dhabeel naag ah*
*Dheddig iyo labood aniga oo, kala dhex jooggood ah*
*Miyaan dhudaha Reer Magan Warfaa, dhaar u kala qaaday? (Barkhadle 308).*

**Galliin**

Meerisyadan hoose waxaa laga soo qaatay gabayga “Galliin” ee uu tiriyey Abwaan Muxumed Maxamed (Indhageelle). Waa meerisyo miisaan culus oo tusaale u ah doorka ay maansada ku leedahay nabadda iyo wadajirka bulshada Soomaaliyeed.

*Allow nabaddu waa shay gudbane, garasho yaw yeesha …*

*Allow yaa is garabsada kolley, kalama guurtaane…*

*Allow yaa gantaallaha dhigtoo, gacal walaalooba… (Siyad). (nd), 2013.*

## Qoraallada la Mawduuca ah Cilmibaaristan

**Hordhac**

Qeybtan waxay ku saabsan tahay qoraallada ay qoreen qoraayada Soomaaliyeed ee ka hadlaya mawduuca ay cilmibaaristan ku saabsan tahay ee maansada nabadda.

Intii uu cilmibaaruhu ku hawlanaa diyaarinta daraasadan, wuxuu dib-u-eegid iyo baaritaan mug leh ku sameeyey qoraallada suugaaneed ee ku

saabsan maansada Soomaaliyeed iyo doorka ay ku leedahay nabadda iyo daminta colaadaha. Wuxuu ogaaday in ay yar yihiin cilmibaarisyada aqooneed ee laga sameeyey mawduucan. Balse, wuxuu ogaaday in dhawr buug oo ay tayadooda fiican tahay laga qoray.

Buugaagta maansada Soomaaliyeed iyo nabadda laga qoray ee cilmibaaristan uu cilmibaaruhu ku ogaaday, waxaa ugu muhiimsan "*Diiwaanka Nabadda Soomaaliyeed (Hore, Hadda iyo Hadhow*) oo ay qortay Barafasoor Deeqa Jaamac Colujoog oo ah aqoonyahanad Soomaaliyeed oo baratay, kuna takhasustay cilmiga bulshada. Barafasoor Deeqa waxay soo noqotay Guddoomiyihii Akademiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta (1977 – 1980). Sidoo kale, waxa ay soo noqotay bare sare, iyadoo ka soo shaqeysay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (1974 – 1990).

Buuggeedan oo ka kooban 601 bog, waxaa la daabacay sanadkii 2018. Waxaa Magaalada Istooghoom ee Dalka Iswiidhan ku daabacday Shirkadda Daabacaadda ee *Scansom Publishers*. Ka dib, waxaa buugga la soo gaarsiiyey Dalka Soomaaliya.

Sida magaciisa laga dhadhansan karo, buuggan wuxuu ka mid yahay amaba ugu horreeyaa buugaagta laga qoray mawduuca nabadda iyo maansada Soomaaliyeed. Waa buug ka dhashay cilmibaaris qaadatay muddo 30 sano ah oo tayo sare leh.

*Diwaanka Nabadda Soomaaliyeed (Hore, Hadda iyo Hadhow)* waa daraasad cilmibaaris oo aad u xeel dheer, taas oo ku dhisan aqoon, ogaal iyo abla-ableyn dhammaystiran oo aad loogu faaqiday, looguna faalleeyey nabadda iyo colaaddaba.

Waa buug ay af iyo aqoonba ka dheefi karta bulshada Soomaaliyeed. Waxaa looga faa'iideysan karaa dhanka cilmibaarista nabadda, xallinta khilaafaadka, suugaanta, maamulka, hoggaamin ku dhisan dhaqanka iyo cilmiga bulshada guud ahaanba.

Buugga labaad ee mawduucan laga qoray waa "*Godob La'aan*." buuggan waxaa qoray Abwaan Xuseen Cabdi Xalane oo ah aqoonyahan Soomaaliyeed oo shahaado sare ku soo diyaariyey cilmiga nabadda, sidoo kalana aad ugu xeel dheer cilmiga bulshada guud ahaan, gaar ahaan, dhaqanka iyo maansada Soomaalida raacatada ah.

Xuseen Cabdi wuxuu laba jeer soo noqday Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Fadaraalka ah ee Soomaaliya. Wuxuu kaloo ka soo shaqeeyey haayado caalami ah oo ay ka mid tahay Haayadda *Save the Children* oo madax sare ka soo noqday. Hadda waa Danjiraha Dalka Soomaaliya u fadhiya Isutagga Imaaraadka Carabta.

Buuggiisan muhiimka ah, *Godob La'aan*, waa buug ka kooban 147 bog. Waxaa la daabacay sanadkii 2021. Waxaa Magaalada Qaahira ee Dalka Masar ku daabacday Shirkadda Daabacaadda ee *Hiil Press* oo ah shirkad buugaag fara badan daabacday.

Waxaa buuggiisan looga faa'iideysan karaa

barashada maansada nabadda ee Soomaalida, maansayahannada nabadda ka maansooday, afka Soomaaliga, dhaqanka Soomaalida, habnololeedka bulshada Soomaaliyeed, falsafada daraaseynta colaadaha Soomaalida raacatada ah iyo cilmiga bulshada, guud ahaan.

Buugga saddaxaad ee uu cilmibaaruhu soo akhriyey intii baaritaanka waday, waa buugga "*Gabayaagii Murtida Qamaan Bulxan*" ee uu qoray Maxamed-Deeq Cabdi-Madar (Haldhaa) oo mar ka tirsanaan jiray Guddiga Af Soomaaliga. Waa buug ka kooban 414 bog. Waxaa daabacday Shirkadda Daabacaadda ee *Haldhaa Publishing* oo ku daabacday Magaalada Borlange ee Dalka Iswiidhan, sanadkan 2022.

Waxaa buuggiisan looga faa'iideysan karaa barashada jirtadii Abwaan Qammaan Bulxan Yuusuf, dhacdooyinkii dagaalladii bulshada raacatada & reer guuraaga ah ee Doollo & Ciid, daraaseynta colaadaha geelleyda Soomaaliyeed, afka iyo suugaanta, kaalinta gabyaaga Soomaaliyeed ee nabadda iyo ama cilmiga bulshada.

Buugga afraad waa buugga "*Haldoor Diiwaanka Jacaylka*" ee uu qoray Maxamed Cabdiqaadir (Stanza). Buuggan oo ay ku urursan yihiin maansooyinka afka Soomaaliga ee Abwaanka Stanza, waa buug ka kooban 324 bog. Waxaa Magaalada Qaahira ku soo daabacday Shirkadda Daabacaadda ee *Hiil Press,* sanadkii 2020.

Waxaa buuggan looga faa'iideysan karaa cilmibaarista nabadda, waddaniyadda, siyaasadda, af Soomaaliga, noocyada maansada, dhaqanka iyo cilmiga bulshada.

Buugga shanaad waa buugga "*Aadan-carab (1917 – 2001)*. Waa diiwaan ay ku urursan yihiin maansooyinka Abwaan Aadan Axmed Yuusuf oo ka mid ahaa abwaannadii ugu caansanaa Degmada Buuhoodle ee Gobolka Togdheer. Waa diiwaan ka kooban 417 bog. Waxaa qoray qoraaga caanka ah ee Soomaaliyeed, Axmed Faarax Cali (Idaajaa) oo ka mid ah qoraayada waaweyn ee Soomaalida. Waxaa sanadkii 2021 Qaahira ku daabacday Shirkadda Daabacaadda ee Hiil Press.

Waxaa buuggan looga faa'iideysan karaa daraaseynta colaadaha Soomaalida, abbaanduulka, nabadda, taariikhda shiqaaqooyinkii Hawd ka dhacay, maansada Soomaalida, dhaqanka, afka Soomaaliga iyo weliba guud ahaan cilmiga bulshada.

Buugga lixaad waa buugga "*Wan iyo Waraabe Saarkii Carays Ciise (1921 – 1972).*" Waa buug ka kooban 301 bog oo ah saarkii Carays Ciise Kaarshe. Waxaa qoray qoraaga buuniga ah ee Soomaaliyeed, Axmed Faarax Cali (Idaajaa). Waxaa Magaalada Qaahira ku daabacday Shirkadda Daabacaadda ee Hiil Press. Sanadka buuggan la daabacay kuma qorna. Lama garanaya sababta sanadkaas looga tagay.

Buuggan waxaa looga faa'iideysan karaa barashada curinta saarka, af Soomaaliga, taariikhda siyaasadeed ee gobannimadoonkii Soomaalida, dhaqanka, doorka maansada iyo maansayahan ee nolosha Soomaalida iyo weliba

cilmiga bulshada.

Buugga toddobaad waa buugga "*Halgankii iyo Hal-abuurkii Saado Cali Warsame*." Waa buug ka kooban 199 bog. Waxaa qoray Abwaan Yuusuf Xasan Ismaaciil oo ka mid ah abwaannada, qoraayada iyo suugaan-ururiyayaasha Gobolka Sool, ahna bare af Soomaaliga ka dhiga dugsiyada sare ee Gobolka Sool. Waa buug ka kooban 350 bog. Waxaa sanadkii 2020 Magaalada Qaahira ku daabacday Shirkadda Daabacaadda ee Guuguule oo ka mid ah shirkadaha daabacaadda ee Soomaalida.

Buugga siddeedaad waa buugga "Tix iyo Tagto" oo uu qoray Golaha Hal-abuurka Gobolka Sool. Waa buug ka kooban 277 bog. Inkastoo aysan qorneyn meesha iyo milayga la daabacay, haddana cilmibaaraha wuxuu og yahay in ay Shirkadda Daabacaadda ee Guuguule ku soo daabacday Magaalada Qaahira sanadkii 2021.

Buuggan waxaa looga faa'iideysan karaa barashada ereyada guunka ah ee af Soomaaliga, daraaseynta suugaanta Soomaalida, taariikhda, dhaqanka, doorka maansada iyo maansayahan ee nolosha Soomaalida, daraaseynta colaadaha beelaha, siyaasadda, xallinta khilaafaadka, dersidda fikirka reer miyiga iyo cilmiga bulshada.

Buugga sagaalaad waa "*Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan*" ee uu qoray taariikhyahanka caanka ah, Sheekh Jaamac Cumar Ciise. Wuxuu ka kooban yahay 285. Waxaa sanadkii 1999 Oslo ku daabacay *Darwiish Publishing House.* Waxaa looga faa'iideysan karaa af Soomaaliga, suugaanta, taariikhda iwm.

**Manhajka**

Qaabka xogta cilmibaaristan ku jirta loo habeeyey waa faalleyn iyo faaqidaad ku saabsan maansooyinka nabadda iyo doorka maansayahannada curinta ka sameeyey maansada ku saabsan nabadda bulshada iyo beelaha Soomaaliyeed. Waa faallo lagu faaqidaya sida ay abwaannada mudnaanta u siiyeen nabadda, laguna soo bandhigayo mugga iyo miisaanka ay maansooyinkooda leeyihiin.

Aalad aqooneedda uu cilmibaaruhu u adeegsaday ururinta xogta ku jirta cilmibaaristan waa aaladda MLA – *Modern Language Association* – oo ah aalad aqooneed loo adeegsada xog-ururinta ku saabsan cilmibaarista cilmiga bulshada si aysan u dhicin xatooyo xogeed, loona xuso isha xogta laga keenay.

## Gungaarka Cilmibaarista

Cilmibaaruhu wuxuu akhriyey ugu yaraan 30 maanso oo ay abwaanno kala duwan oo Soomaaliyeed nabadda ka tiriyeen, kuwaas oo isugu jira gabayo, geeraarro, buraanburro iyo jiiftooyinka. Wuxuu kaloo akhriyey dhawr buug oo ay qoreen qoraayo Soomaali ah. Wuxuu kaloo akhriyey maqaallo iyo faallooyin ka bixinaya maansada nabadda iyo doorkeeda. Wuxuu daawday ugu yaraan shan wareysi oo mawduucan ku saabsan iyo maansooyin duuban oo daalacan. Waxaa xusid gaar ah mudan doorka gabadhaha Soomaaliyeed iyo buraanburkooda oo uu u sii kuurgalay.

**Faalleynta Maxsuulka Cilmibaarista**

Ka dib markii uu dhugtay, dhuuxay ee uu dhooroofay dheeha iyo dhumucda maansada Soomaaliyeed iyo doorkeeda nabadda, wuxuu cilmibaaruhu garowsaday in maansada Soomaalida ay door weyn ka ciyaarta nabadda iyo xasilloonida guud. Sidaas awgeed, maansayahanka waa *nabad-abuure iyo nabad-ilaaliye* bulsheed. Arrintan waxaa caddeyn u ah oo loo cuskaday ciraabta sare ee abwaannadeenna.

## Gunaanadka Cilmibaarista

Cilmibaaruhu wuxuu cilmibaaristan ku ogaaday, kuna aqoonsaday in maansada Soomaalida ee ay hal-abuureen abwaannada kala duwan ee Soomaaliyeed, kuwa nool iyo kuwii dhintayba, ay door aan la dhayalsan karin ka qaadata nabadda, degganaanta, wadajir iyo deriswanaagga bulshada Soomaaliyeed ee walaalaha ah.

Wuxuu kaloo ku ogaaday in hal-abuurka (Abwaanka) Soomaaliyeed uu ku abuuran yahay dareen nabadeed iyo dejin bulsheed, sidaas darteedna uu kahortagga colaadaha sokeeye ku baraarugsan yahay, in ka badan inta uu qofka caadiga ah ku baraarugsan yahay. Maansayahanka Soomaaliyeed waxaa lagu macneyn karaa in uu yahay "*darbane nabadeed iyo dirsane danguud*." Waxaa u muuqdaan wax aan uba muuqan karin bulshada kala nooca ah ee Soomaaliyeed ee uu ku dhex nool yahay.

Sida uu cilmibaaruhu ku haleelay, kuna hubsaday hayaankii daraasadan, hal-abuurka Soomaaliyeed wuxuu leeyahay garasho qofeed, qab ummadeed, qiimeyn afkaareed, qiiro waddaniyadeed iyo qoomamo colaadeed oo uu ku soo gudbiyo maansadiisa.

Ugudambeyn, wuxuu cilmibaaruhu ogaaday in aysan bulshada Soomaaliyeed fahmin, ka faa'iideysan oo aysan ka falcelin falsafada maansada Soomaalida. Waxaan si dhab ah loo dhugan dhambaallada nabadeed ee maansada ku duugan.

## Talabixin

Ka dib markii uu cilmibaaruhu gartay ee garwaaqsaday doorka maansada iyo kaalinta hal-abuurka Soomaaliyeed ee nabadda, wuxuu soo jeedinaya talooyinkan:

1) In aqoonyahannada Soomaaliyeed ay ku wada baraarugsan doorka maansada Soomaalida ay ku leedahay jiridda iyo joogteynta nabadda iyo xasilloonida.
2) In gabyaageenna maansadiisa nabadda xajinteeda looga faa'iidestaa.
3) In jaamacadaha lagu barta daraasaadka nabadda ay maansada Soomaaliyeed ee nabadda laga curiyey manhajkooda ku darsadaan oo ay daraaseeyaan.
4) In maaddada barashada nabadda lagu soo kodhiyaa dugsiyada sare, maansada Soomaaliyeed ee nabadda laga tiriyeyna si cilmiyeysan oo saxan loogu baraa.
5) In xarumaha cilmibaarista iyo haayadaha caalamiga ah ee nabadda ka shaqeeyo sida, Interpeace tababarradooda nabadda ay maansada ku daraan.

6) In gabyaaga Soomaaliyeed maansooyinkiisa nabadda ku saabsan lagu xardhaa meelaha dalka laga soo gala iyo tabbeellooyinka suuqyadeenna ku yaallaan.
7) In kor loo qaadaa tartamada maansada nabadda iyo xasilloonida ku saabsan.
8) In ay aqoonyahannada Soomaaliyeed ee bartay cilmiga bulshada si xeeldheer u dersaan dulucda iyo falsafada ay maansada Soomaalida xambaarsan tahay.
9) In maansada Soomaalida cilmiga badan ee ku aasan looga faa'iideystaa hagidda iyo hagaajinta nolosha guud ee dhallinyadeenna Soomaaliyeed.
10) In aan maansada Soomaalida loo arkin madadaalo oo keliya ee loo fahmaa in ay tahay manhaj nololeed oo ay maamul iyo maareynba ku jiraan.

## Tixraacyo


Barkhadle, Maxamed-Deeq. Gabayaagii Murtida Qamaan Bulxan. Borlange: Haldhaa Publishing, 2022.

Bile, Abdikarim. "Buraanbur Nabada Taleex." You Tube, waxaa soo galiyey Bile, 29 Diisembar. 2018. https://www.youtube.com/watch?v=Zwm7sM68iog

Xalane, Xuseen. Godob La'aan. Qaahira: Hiil Press, 2021.

Daa'uud, Maxamed. Haldoor Diiwaanka Jacaylka. Qaahira: Hiil Press, 2021.

Daljir. "Abwaan Cali Food oo Gabay ka tiriyey Nabada." You Tube, Daljir ayaa soo galiyey, 30 Seb. 2020. https://www.youtube.com/watch?v=Tjl4ryENNiY&t=15s

Siyad, Mohamed. "GABAY: Abwaan Muxumed Maxamed Indhageelle iyo GABAYGII GALLIIN." You Tube, Siyad ayaa soo galiyey, 2013. https://www.youtube.com/watch?v=DUXgt0dM5ow

Cali, Axmed. Wan iyo Waraabo Saarkii Carays Ciise (1921 – 1972). Qaahira: Hiil Press, tm.

Cali, Axmed. Aadan-carab (1917 – 2001). Qaahira: Hiil Press, 2021.

Ciise, Jaamac. Diiwaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Oslo: Darwiish Publishing House, 1999.

Col-u-joog, Deeqa. Diiwaanka Nabadda Soomaaliyeed (Hore, Hadda iyo Hadhow). Stockholm: Scansom, 2018.

Golaha. Tix iyo Tagto. Qaahira: Guuguule, 2021.

Ismaaciil, Yuusuf. Halgankii iyo Hal-abuurkii Saado Cali Warsame. Qaahira: Guuguule Publishing, 2020.